



MAANDAAAR

Madasha dhiirrigeliyeyasha da'yarta



UGU HORAYN NAFTAADA BARO!! 16NOV, 2018, SHEEKADII SANAMKA!! QAYBTA DHIIRRIGELINTA, 01

Dadka intooda badani ma oga xaqiiqada awoodhooda aan xuduudda lahayn ee ilaahay u hibeeyey waqtigiisa ayuu qofku luminayaa, noloshiisa iyo waqtigiisana wuxuu ku iibinayaa qiimo jaban. Sheekadan waxay ina tusi doontaa inaan barano xaqiiqda awoodaha inagu qarsoon ee aan ka jaahil nahay.

Laba kun oo sano ka hor waxaa kulmay khubaro shiinays ah oo ay go'aansadeen inay qoraan sanam dahab ka samaysan oo miisaankiisu ka badanyahay 5 tone (boqol kun oo kilo garaam). Hadafta dhismihiisa ay ka lahaayeen wuxuu ahaa in uu noqdo hido iyo dhaqanka dalka shiinaha ugu wanaagsanaa ee taariikhdu ka hadasho , oo dalxiisayaasha iyo cid waliba u daawasho tagaan, weyna ka dhabeeyeen dhismaha mashruucaas.

Markii ay dhamaystireen dhismaha sanamka aadka u wayn, ayaa waxaa soo weeraray shiinaha ciidan lagu magacaabo barmuud , ciidankaas oo lagu yaqaanay shar iyo dagaalyahanimo daran, kuwaas oo markay meel soo weeraraan shay walba ooo ay la kulmaan dumiya oo guba ooh aba yaraatee aan wax nool ka tegin. Ragii dhisay sanamka waxay u bageen in ciidankaasi sanamka arko , waxayna go'aansadeen inay sanamka dhoobo mariyaan si aysan u arkin ciidankaasi inuu dahabyahay. Ciidankii waxay soo gaareen tuuladii sanamku yaalay wax walbana waa gubeen dadkii tuulada joogay oo ay ku jiraan ragii sanamka dhisayna waa laayeen. Sanamkii way arkeen lkm dan kama aysan gelin waayo waxay moodayeen inuu sanam dhoobo ah yahay wayna isaga tageen.

Wax waqtiga is riixaba, sanadba sanad usii gudbo, mar laga joogo 150 kun oo sano Kadib ayaa masuuliyiintii shiinaha ee xiligaa waxay go'aan sadeen inay soo raraan sanamka oo la keeno magaalada biiin ee caasimada shiinaha. Maadaama uu yahay hido iyo dhaqan dalku leeyahay,

Balse dowladdu marka ay sidaas leedahay ma ogayn waxa uu sanamku ka samaysanyahay oo waxay u haysteen dhoobo oo keliya. Waxay isu keeneen qalabkii iyo gaadiidkii lagu rarlahaa oo dhan waxayna laakiin jawiga oo aad u qaboobaa dartii roobab badanina da'ayeen ayaa waxaa dhacday in sanamkii meel ka dilaaco, ninkii madaxa u ahaa ragii qaadayey sanamka ayaa amray in dib loo dhigo qaadista sanamka illaa maalin dambe oo cimiladu hagaagto. Sidii ayey sameeyeen sanamkii oo dhulka yaalla ayey ka tageen.

Odaygii looga tagay ilaalinta sanamka wuxu ahaa oday faduul badan oo jecel wax waliba inuu ogaado, wuxuu soo qaatay toosh oo ku ifiyey meeshii uu sanamku ka dilaacay wuxuuna arkay in iftiinka tooshku Kusoo noqonayo oo wax soo celinayaan. Ma rumaysan arinka waayo dhoobadu iftiina masoo celiso, wuxuu soo qaatay dubbe iyo masaamiir wuxuuna kusii wayneeyey dilaacii kadibna tooshkii ayuu kusii ifiyey wuxuuna arkay in iftiinku awood badan Kusoo noqonayo . taasi waxay kor u qaaday himadii odayga wuu sii qoday dilaacii weliba ragii kale ayuu caawimaad ka dalbaday dhamantoodna waxay bilaabeen inay dhoobada ka fiiqaan sanamka dushiis. Toban saacadood oo shaqo ah kadib waxaa dhacday arin layaab ku noqotay ragii oo dhan.

Waxay ogaadeen in sanamka intaa le eg uu ka samaysanyahay dahab sooc ah (dahab kaliya), kaasoo qiimihiisu uusan qiyas lahayn weligoodna aysan arag isagoo kale. Waxay heleen sanam dahab ka samaysan dhoobana dusha ka saarantahay, waxay ogaadeen in qiimaha sanamku yahay mid xad dhaaf ah. Warkii ayey faafiyeen iagoo faraxsan, masuuliyiintii shiinaha ayaa arintii soo farageliyey , sanamkii waa la raray oo bijiin ayaa la geeyey si uu u noqdo meel loo soo daawasho tago.

Sanamkii wuu yaallaa shiinaha illaa maantadan aan joogno. Qisadiisuna dusha ayey kaga qoran tahay, waxaa kale oo ku dul qoran xikmad shiineys ah oo tiraahda “ dhoobada hoosteeda kansii baa ku jira”

Aniguna waxaan leeyahay qofkasta oo bani aadam ah waxaa ku dhex jira kansi ah awood uu Allah dhex dhigay, ALLAH waxa uu leeyahay “وفي انفسكم افلا تبصرون” oo ah “ naftiina dhexdeedana miyeydaan fiirinayn?” hadaba dadka intooda badani ma fiiriyaan mana oga awoodda rabaaniga ah ee dhexdooda ku jirta, maxaa yeekay deegaanka ku hareeraysan ayaa waxaa ka buuxa baraaamajo hore iyo aaminaad khaldan oo waqti hore kasamaysantay deegaanka ku xeeran oo ay kow ka yihiin labada waalid, kadibna qoyska, waxaa kusii xiga bulshada, waxaa kusii xiga madarasada, waxaa kasii mid ah saaxiibada waxaa kamida saxaafadda, waxaa kamida qiyamkiisa taariikheed iyo dhaqan ahaaneed.. 90% kamid ah qiyamkeena kamid ah waxaan ka kasbanaa caalamka inagu xeeran kaasoo si khaldan inoo borogaraameeya.

Daraasad ay sameeyeen qaar kamid ah baarayaasha kuliyadda caafimaadka ee jaamacada saanfaransiiko waxayna baarayeen Nooca borograam eee aadanaha, waxay ogaadeen inteeda badan inay tahay mid khaldan oo lidkeena ah, waxayna ka dhigantahay inay awoodeenii qarsoonayd aasto oo ay ku dabooosho aaminaad , dareen iyo garasho khaldan,.. waxayna isku mid yihin Sheekadii sanamkii dhoobadu ku daboolnayd we aan kasoo sheekaynay kaasoo gudihiisa ay ku jirtay qiimo aan xuduud lahayn.

Allah waxa uu inaga dalbaday inaa abuurkeena hoos u eegno oo aynaan ku raadoobin borogaraamyada khaldan ee aan deegaanka ka dhaxalnay. Oo an dareeno qiimeheena iyo qaayeheena iyo awoodda inagu duugan si aan uga baxno mugdiga dib u dhaca una isticmaalno awoodeheena kuna bedelno nafteena iyo caalamkaba!!



Mashruuc dhireed jaamacadda sanfransisco



**NOQO SAAXIIB JOOGTA AH EE BARNAMIJKA MAANDAAR,
LAHADAL OO DHAGAYSO HADALKA BULSHADA!**

“DAQIIQADDA OGAALKA”